

GARGAARIDA CODEEYAH

 **VOTE**
2024

Waxaa jira siyaabo badan oo ay dadka naafada ah si gaar ah ugu codeyn karaan si madax-bannaan.

HELBIDHAALKA GOOBTA CODBIXINTA

Sharciga gobolka iyo federaalku waxay dalbayaan in goobaha codbixinta ay ahaadaan kuwo si jireed loo geli karo. Magaaloo yinka iyo tuuloo yinku badanaa waxay doortaan goobaha codbixinta waxayna mas'uul ka yihiin helitaanka goobta codbixinta.

CAAWIMAAD KA TIMAAD DADKA KALE

Waxaad soo kaxaysan kartaa qof kasta si uu kuugu caawiyo inta aad codeynayso ama waxaad ka heli kartaa caawimaad garsoorayaasha doorashada. Kama heli kartid caawimaad loo-shaqeeyahaaga ama ururkaaga. Kaaliyahaagu wuxuu ka qayb qaadan karaa dhammaan qeybaha habka codbixinta. Kaaliyayaashu ma saameyn karaan sida aad u codeynayso ama uma calaamadin karaan warqadda codbixinta adiga haddii aadan u sheegi karin cidda aad rabto inaad u codeyoso.

SAXIIX AFKA

Waxaad xaq u leedahay inaad afka ku xaqiijiso qofka aad tahay iyo inaad weydiisato qof kale inuu kuu saxiixo haddii aadan saxiixi karin magacaaga.

CODEEYAASHA HOOS YIMAADA MASUUL

Waxaad codeyn kartaa xitaa haddii aad ku jirto masuul ilaa uu garsooruhu si gaar ah uga qaadin xuquuqdaada inaad codeyoso amar maxkamadeed.

TAARIKHHAHA 2024

CODEE HORE

Janaayo 19 - Maarsø 4

DOORASHADA

HORDHACA

MADAXWEYNAHA

Talaado, Maarsø 5

CODEE HORE

Juun 28 - Agoosto 12

DOORASHADA

HORDHACA

Talaado, Agoosto 13

CODEE HORE

Sebtember 20 -
Noofambar 4

MAALINTA

DOORASHADA

Talaado, Noofambar 5

wuu sii socdaa dhinaca dambe...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mrvotes.gov • 1-877-600-VOTE

GARGAARIDA CODEEYAH



...wuu sii socdaa laga soo bilaabo hore

MASHIINKA CODBIXINTA LA HELI KARO

Goobaha codbixinta waxay leeyihii mashiin ku calaamadin kara warqadda codbixinta adiga. Waxay ku siinaysaa asturnaan haddii aadan (ama aadan dooran) inaad u codeyso adigoo isticmaalaya qalin. Mashiinku wuxuu leeyahay shaashad muujinaysa warqadda codbixinta oo xarfaha waaweyn ku qoran ama asal u leh midab isbarbardhig sare. Sidoo kale waxay akhrin kartaa warqadda codbixinta adiga oo adeegsanaya sameecadaha dhagaha. Wuxuu buixin kartaa warqaddaada codbixinta adigoo isticmaalaya kumbuyutarka Braille, shaashadda taabashada, ama qalabka 'sip-and-puff'. Markaad sameyso doorashooyinkaaga, mashiinku wuxuu daabacayaa warqaddaada codbixinta ee dhammaystiran.

CODAYNTA DHINACEEDA AH

Haddii aadan si fudud uga bixi karin gaarigaaga, waxaad cadsan kartaa in warqadda codbixinta laguugu keeno dibadda. Tani waxaa loo yaqaan 'codaynta dhinaceeda.' Laba garsoore doorasho oo ka kala socda laba xisbi siyaasadeed oo waaweyn ayaa kuu keeni doona warqadda codbixinta. Markaad dhammaystirto codbixinta, garsoorayaasha doorashadu waxay warqaddaada codbixinta gudaha u geyn doonaan oo sanduuqa codbixinta ku ridi doonaan.

HEL WARQADDA CODBIXINTA BEDDELKA AH

Waxaad xaq u leedahay in laguu beddelo warqadda codbixinta haddii aad khalad ku samayso warqaddaada codbixinta ka hor inta aadan codkaaga dhiibin.

GUDBI CABASHO

Waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso cabasho qoraal ah goobtaada codbixinta haddii aadan ku qanacsanayn sida doorashada loo maamulayo.



Iskaan koodhkan si aad u booqato
mnvotes.gov una diiwaangeliso inaad
codeyso!